

4. Iyo sharka Sixirrowga wax ku tufa guntimaha.

وَمِنْ شَرِّ النَّفَّاثَاتِ فِي الْعُقَدِ ﴿١٤﴾

5. Iyo sharka Xaasidka wax Xasda.

وَمِنْ شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ ﴿١٥﴾

Suuraddani waxay Caddayn ku Xidhnaanta Eebe iyo ka magangalkiisa wixii wax dhiba sida Sixirka, Xaasidka iyo wax kastoo xun.

Caa'isha waxaa laga wariyey in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) markuu xanuunsado uu isku akhriin jiray Mucawadataynka (Labada magangelyo) iskuna tufi jiray, markuu xanuunku ku darraadayna aan ku akhriin jiray magangalyooyinka Gacantiisana jidhkiisa ku masixi jiray Barako darteed.

Waxaa sheegay Bukhaari, Imaamu maalik, Abuu Daa'uud iyo Nasaa'i. Al-Falaq (1-5).



Suurat An-Naas

سُورَةُ النَّاسِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa «Nabiyow» waxaan ka magangeley Eebaha dadka barbaariya.

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ ﴿١﴾

2. Ee dadka xukuma.

مَلِكِ النَّاسِ ﴿٢﴾

3. Ee ah Ilaaha dadka.

إِلَهِ النَّاسِ ﴿٣﴾

4. Sharka «iyo xumaanta» waswaasiyaha qarsoon.

مِنْ شَرِّ الْوَسْوَاسِ الْخَنَّاسِ ﴿٤﴾

5. Ee waswaasiya laabta «Qalbiga» dadka.

الَّذِي يُوسْوِسُ فِي صُدُورِ النَّاسِ ﴿٥﴾

6. «Kuwaas wax waswaasinaya» oo ah jinni iyo insiba.

مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ ﴿٦﴾

Sidaa oo kale waxay suuraddan sheegi in Eebaha awoodda leh laga magan galo xumaanta iyo sharka kuwa wax dhibay waxna waswaasinaya, xumaanloowgana ah, ama jinni ha ahaadeen ama insi ha ahaadeene. Waxaa dhab ah in had iyo jeer ay jiraan dhibayaal waxumatashiila, dadka ka qasa diintiisa, aakhara-diisa, iyo noloshiisaba. Hadaba waa in kuwaas Eebbe laga hoos galaa, lagana digtoonaadaa.

Abuu darri waxa laga wariyay inuu yidhi: «Waxaan u imid Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebbe ha yeelee» oo masjidka jooga markaasaan fariistay wuxuuna yidhi» Abuu dar ma tukatay? waxaan idhi maya, wuxuu yidhi istaag oo tuko, wuxuu yidhi waan istaagay oo waan tukaday, waana fariistay, markaasuu yidhi». Abudar ka magan gal Eebe sharka shayaadiinta insiga iyo jinniga. Markaasuu yidhi waxaan idhi: Rassaulki Eebow Insigu ma shayaadiin buu leeyahay? markaasuu yidhi: «Haa». waxaa wariyay Imaam Axmad iyo Ibnu Maajah. An-Naas (1-6).